



OLIKA MEN LIKA
Fierspråkigt deltagarstöd

RÄTT ATT LEVA

Golaha sharciga ardayda Dugsiyada sare ee dadka waaweyn (Folkhögskolor) ayaa qiimaynaya in dugsiyada mid ka mid ah aanu raacin habka loogu tala galay markay noqoto baaritaan khuseeya dhibaataada. Dugsiga ayaa laga yaabaa in uu faquuqay ka qaybqaataha.

Olika men lika iyo Ensamkommandes Förbund ka qaybqaatahooda oo qabo cudurka autism-ka ayaa mid ka mid ah Dugsiga sare ee dadka waaweyn (folkhögskola) dhibaateeyay. Inkasta oo ka qaybqaatuhu cabasho u gudbiyay shaqaalaha dugsiga sare ee dadweynaha dhowr jeer, haddana wax baaritaan ah laguma sameyn. Golaha sharciga ardayda Dugsiyada sare ee dadka waaweyn (folkhögskolor) ayaa qiimaynaya in dugsiga sare ee dadka waaweyn aanu raacin habka loogu tala galay markay noqoto baaritaan khuseeya dhibaataada iyo in habka aan ka hadlayno aysan ka qaybqaatayaasha Dugsiyada sare ee dadka waaweyn heli karin. Olika men lika iyo Ensamkommandes Förbund waxay sidoo kale rabaan in ay feejignaan gaar ah siiyaan in dugsiga sare ee dadka waaweyn laga yaabaa in uu faquuqay ka qaybqaataha, sababtuna ay tahay helid la'aanta ka jirto shaqadooda iyo in ay ka gaabiyeen waajibka saaran ee ah in ay baadhaan kiiskan dhibaataada.

Nagala soo xidhiidh wixii macluumaad dheeraad ah:

Sofia Quiroga, mas'uulka taakuleynta ka qaybqaatayaasha Olika men lika

sofia.quiroga@abf.se

Mira Björkegren, hogaamiyaha mashruuca Rätt att leva

mira.bjorkegren@ensamkommandesforbund.se

Ninni Wallström, Bare bulsho Rätt att leva

ninni.wallstrom@ensamkommandesforbund.se

Arvsfondsprojekt Olika men Lika, kaas oo la shaqeeya oo u shaqeeya dadka qaba nooc ka mid ah naafooyinka ee aanu afkooda hooyo ahayn luqadda iswidhishka, iyo Ensamkommandes Förbund arvsfondsprojekt Rätt att leva ayaa la xidhiidhay ka qaybqaataha oo u baahnaa in laga caawiyo la xidhiidhista dugsiga sare ee dadka waaweyn. Waxay ahayd dhowr toddobaad oo ay dhibaataadu ka sii daraysay iyada oo aanu dugsiyu bilaabin wax baaritaan ama tallaabooyin uu qaaday.



OLIKA MEN LIKA
Fierspråkigt deltagarstöd

RÄTT ATT LEVA

Golaha sharciga ardayda ee Dugsiyada sare ee dadka waaweyn (FSR) ayaa ku wargeliyay dugsiya sare ee dadka waaweyn in aynan raacin habka loogu tala galay markay noqoto baaritaan khuseeya dhibaataada. Intaa waxa dheer, inay FSR ay ku taliyeen in dugsiya u diyaariyo buug-gacmeedka ka qaybqaatayaasha si ay dhammaan ardayda u helaan warbixin iyada oo aan loo eegin naafanimada. Waxaan u aragnaa inay taladani tahay mid muhiimad gaar ah u leh iyada oo la tixgelinayo in dugsiya sare ee dadka waaweyn uu waxbarasho siinayo dadka u baahan taageerada gaarka ah ama leh naafo taas oo saameynaysa habka waxbarashadooda.

Olika men Lika iyo Ensamkommandes Förbund waxay rabaan in ay feejignaana gaar ah siiyaan FSR in aynan magacdhabin soo jeedintooda in uu ka qaybqaataha qabo cudurka autism-ka, sidaa darteedna in uu dugsiya sare ee dadweynaha markale gabay waajibaadkooda. Dhammaantood Dugsiyada sare ee dadka waaweyn waxaa ku waajib ah inay si degdeg ah u baadhaan dhacdooyinkan iyo in ay bixiyaan taageero gaar ah oo khuseeya shaqooyinkooda. Waxaan ka caawinay ardayga inuu sameeyo dacwad ku saabsan takoorid oo uu u diray Malmö mot diskriminering taas oo ka dhan ah takoorida, iyaga ayaana hadda baaraya kiiskan.

Leenk loogu talagalay ra'yiga golaha waxbarashada dadka:

<https://folkbildningsradet.se/media/xokhkihw/yttrande-fran-fsr-om-eslovs-folkhogskola.pdf>